

# Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneyisa ee DPS

## Kulanka 3aad / Caqabadaha Diiwaangelinta Yaraaneyisa, 23ka Maajo, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Kulamadu waxay ku bilowdaan 4ta galabnimo soo-dhaweyn iyo isxaadirin. Luuqadaha la turjumayo ayaa la sheegay, waxaan lagu bilaabay in aan wadaagno wixii ah akhbaar wanaagsan ee toddobaadka. Toddobaadkan waxaa jiray su'aalo badan oo ku saabsan shaqada, habka, iyo walaacyo kale oo la xiriira ama aan la xiriirin mashruucan. Waxaan kulanka ku bilownay su'aalo ku saabsan kooxo isku mar ah oo laga yaabo inay qabtaan shaqo isku mid ah iyo waxyaabo kale. Waxaa la soo caddeeyey wakiilka DPS ee kulamadaas inay ahaayeen sii-wadid ama kordhinta guddiyada kulamada in ay ku jireen xubno kale oo wadaagaya fikrado iyo jawaabo. Weli waxaa jira su'aalo ku saabsan sida kooxuhu isugu wada imaanayaan oo ay macluumaadka u wadaagayaan.</p>
Gul & Heshiisyo	<p>Qeexidda guusha waxaa lagu cusboonaysiiyey talooyin ka yimid xubnaha guddiga. Waxaan ka wada hadalnay/wadaagnay beddelaad ah in la is afgarto si dadka aqlabiyaddoodu u raaci karaan waxa la qoray. Heshiisyada kooxda lama dhammeyn wakhtiga oo yaraa awgiis. Waxa jiray xoogaa arrimo cusub oo la soo jeediyey balse aan laga hadlin ama aan la ansixin. Talooyin ah soojeedinta Tilmaamaha Guusha ayaa lagu soo dirayaa boostada internetka si loogu ansixiyo kulanka afaraad. Kooxdu waxay rabtaa wadahadal furan in lagu daro habraaca.</p>
Faahfaahinta Xogfahmida	<p>Wada-hadal iyo codbixin ayaa laga sameeyey jawaabihii xogfahmida iyo qaar ka mid ah su'aalihii ka soo baxay. Codbixinta waxaa lagu sameeyay internetka goob la yiraahdo mentimeter oo xubnaha guddiga ayaa ka wada shaqeyey oo ku wadaagay fikrado la xiriira xogta. Qaar ka mid ah qodobbada muhiimka ah ee laga soo qaatay xogfahmida ee laga dooday waxaa ka mid ahaa.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Wadarta maalgelinta degmada in ay hoos u dhacday oo ugu wacan ardeyda yaraaneyisa.</b> Waxaa jira walaac ku saabsan Maalgelinta ESSER, Sharciga Cares, iyo sida ay arrintaasi mustaqbalka u egtahay. Haddii ay kordhinta canshuurta guryaha caawin doonto. Sidoo kale, furista iskuullon cusub oo ah jaatar iyo kuwa degmada.</li> <li>● <b>Waxaa adkaaneysa iskuullada yaryar inay bixiyaan barnaamijyo waxbarasho fiican iyo taageerada ardeyda.</b> Mid ka mid ah maamulaha ayaa sheegay in ay waxbarasho fiican hayaan laakiin ay caqabad ku noqoneysa iskuullada isku dhowdhow. Waxaa jirey walaac ku saabsan in aan la waayin TNLI iskuulku markuu u jiro fogaan ah hal meyl. Waxa kale oo jiray wadahadal ku saabsan maalgelinta iyo saameynta arday kasta.</li> <li>● <b>Meelaha qaar ayaa diiwaangelintoodu aad u badan tahay marka loo eego kuwa kale.</b> Dhowr arrimood oo Denver ka jira ayaa keenaya hoos-u-dhac weyn sababtoo ah meelaha qaar heerkii taranka ayaa hoos u dhacay, oo</li> </ul>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
	<p>guryihii ayaa qaaliyoobay, iwm. Waxaa jirta xiiso loo hayo halka ay aadaan ardeyda ka tageysa DPS. Luminta ardeyda macnaheedu ma aha in la helayo kuwa kale.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Diiwangelinta yaraaneysa waxay keentaa caqabado badan.</b> Hal qof ayaa nala wadaagay sida ay 42 arday oo dheeraad ah ay u maalgelin karaan 3 macallin mushaarkooda. Qaar badan ayaa dareensanaa in barnaamijyada yaraada ay kodhiyaan dhibaataada. Iyadoo ku xiran tirada dadka ee adeegyada goobaha qaarkood waa in la sii wado sababtoo ah waa wax sharci ah. Haddii uu iskuul xaq u yeelan waayo TNLI, sababtu waa in ay is beddelayaan tirakoobka dadka deegaankooda ku nool. Afar jaartar ayaa la xiray diiwaangelintooda oo yaraatay awgeed.</li> <li>● <b>Guddoonka Waxbarashada DPS ayaa go'aaminaya sida loo isticmaali doono dhismeyaasha bannaan.</b> Waxa jira walaac ku saabsan xiritaanka iskuullada oo ay sii beddelayaan iskuullo cusub ama jaatarro. Guddoonka ayaa ka codeynaya sida loo isticmaali doono dhismeyaasha bannaan oo waxay talo ka codsanayaan bulshada. Wadahadal dheeraad ah ayaa loo baahan yahay.</li> </ul>
Qodobbada/Arrimihii Kulanka	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Sida kooxdu sheegtay, waxaa weli jira waxyaabo badan oo u baahan in la caddeeyo iyo su'aalo u baahan in laga jawaabo.</li> <li>● Waxaa jira walaac ku saabsan isticmaalka barnaamijka MIRO iyo ama in la hubiyo sida looga hadlayo su'aalaha, falanqeynta, iwm. Xubnaha qaarkood waxaa haysata dhibaato ah teknoolajiga iyo ama in ay ku adag tahay isticmaalidda MIRO.</li> <li>● Waxaan rabnaa wakhti dheeraad ah oo aan si furan u wadaagno oo aan ka hor isugu dirno macluumaadka khuseeya kulanka. Waxaa jira wadahadal aad muhiim u ah oo u baahan inuu dhaco laakiin uma muuqato in loo helayo wakhti ku filan.</li> <li>● Kooxdu waxay soo jeedisay in la duubo kulamada si dib loogu daawato oo ka dibna kulamada loo dheereeyo ama loogu daro kulan dheeraad ah.</li> <li>● Waxaa jira walaac ah haddii habraacyadu la jaanqaadayaan shuruudihii kol hore la dejiyey ee sida Wareegtada Oggolaanshaha DPS.</li> <li>● Goobaha diiwaangelinta miiska ma saaran yihiin?</li> <li>● Waxaa jira su'aal ah sinnaanta goobta iyo codadka, sababtoo ah dadka qaar ayaa ka qeylo dheer dadka kale. Sidoo kale, welwelku waa haddii ay suurtoobeyso in la raaco habka wadahadalka iyo habraacyada.</li> <li>● In markii loo baahdo wadahadalka la hakiyo si wax loo fahamsiiyo dadka loo turjumayo</li> </ul>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Tallaabooyinka Xiga	<ul style="list-style-type: none"> <li>● In wax laga qabto qaar ka mid ah walaacyada heerka sare ah ee kooxda hawsha la qabata DPS</li> <li>● In xubnaha guddiga loo sameeyo waraaq ah Su'aalo iyo Jawaabo ama FAQ</li> <li>● In la qorsheeyo wakhti ah madal doodwadaag ah oo furan</li> <li>● In guddiga loo diyaariyo shaqada guriga ee kulanka soo socda</li> <li>● In laga hadlo mabaadi' hageysa sameynta shuruudaha</li> </ul>